Maahanmuuttovirasto
Migrationsverket
Finnish Immigration Service

# Macmiilka xerada qaxootiga – Waxaa la baarayaa kaararka lacag-bixinta, xilligaas baaritaanku uu socdo khasab mahan in kaararku shaqeeyaan

Waxaa la baari doonaa dhammaan macaamiisha haysta kaararka biriibeydhka ee uu bixiyay Hoggaanka Socdaalka ee Finland. Baaritaanka kaararka wuxuu khuseeyaa dhammaan dadka cusub iyo kuwa horayba u haystay kaarka. Dhammaan dadka iska leh akoonka iyo kaarka, waxaa loo baari doona si joogto ah. Baaritaanku wuxuu u dhacayaa si otomaatig ah, adigana lagaagama baahna inaad samayso wax ku saabsan baatitaanka awgiis. Baaritaanka otomaatigga ah sida badan wax saamayn ah kuma yeelanaayo shaqada kaarka.

Haddii baaritaanku uu u baahdo caddayn dheeraad ah oo ka badan intii caadiga ahayd, kaarkaaga iyo akoonka la xiriira way xirnaan doonaan illaa baaritaanka uu ka dhammaanaayo. Haddii kaarkaaga iyo akoonkaagu aanay shaqaynayn, waxaad la xiriirtaa xeradaada qaxootiga.

## Xerada qaxootiga waxaa ay dammaanad qaadeysaa baahiyahaaga aasaasiga ah inta uu baarintaanku socdo

Haddii aadan haysan hanti kugu filan ama aadan awoodin inaad daboosho baahiyahaaga aasaasiga ah inta baaritaanku uu socdo, xerada qaxootiga ayaa caawimaad ka heli doontaa, tusaale ahaan caawimaadda ku saabsan raashinka iyo daawooyinka.

Laakiin waxaad fiiro gaar ah u yeelataa arrinka ah: haddii baaritaanku uu qaato wakhti ka dheer sidii caadiga ahayd, waxaa dhici karta in kaalmada dhaqaale ee ay xerada qaxootigu ku siiso laga jaro lacagta biilka xerada ama soo dhoweynta (vastaanottorahaa) ee suurtaggalka ah ee ka gadaal lagu siiyo.

Xerada qaxootiga waxay sidoo kale dammaanad qaadi kartaa baahiyahaaga aasaasiga ah haddii aad shaqayso, laakiin aadan isticmaali karin kaarka biribeydhka ah sabab la xiriirta baaritaanka awgiis. Kaalmada dhaqaale ee lagu siiyo waxaa lagaa soo celin karaa marka aad mushaarka hesho.

Wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida baahiyahaaga aasaasiga ah loo daboolaayo inta baaritaanku uu socdo, waxaad ka heleysaa xeradaada qaxootiga.

## Muxuu baaritaanku ku saabsan yahay?

Sharciga ka hortagga lacagaha sida sharci darrada ah loo marsiiyo bangiga iyo ganacsiyada kale (rahanpesu), iyo maalgelinta argagixisada wuxuu ku waajibinayaa, tusaale ahaan, bangiga ama shirkadda bixisa kaarka in ay si wanaagsan u yaqaannaan macaamiishooda. Arrinkaan waxaa ka mid ah in la aqoonsado dadka siyaasiyan saameynta leh (PEP) iyo dadka lagu soo rogay cunaqabataynta dhaqaale ee heer qaran ama heer caalami ah.

Baaritaannada waa kuwo ku saabsan baaritaanka PEP (dadka siyaasiyan saameynta leh) iyo cunaqabataynta. Wasaaradda arrimaha dibadda ee Finland waxay go'aamisay in

lacagta biilka xerada ama soo dhoweynta (vastaanottoraha) aan la bixin karin tan iyo inta uu socdo baaritaanka sharciyeed ee PEP (dadka siyaasiyan saameynta leh) iyo cunaqabataynta.

Baaritaanka waxaa mas'uul ka ah shirkadda bixisa kaarka ee Enfuce. Baarista cunaqabataynta waxay caadiyan qaadataa 1–3 maalmood oo maalmaha shaqada ah, balse mararka qaarkood waxay qaadan kartaa wakhti intaas ka dheer sababo kala duwan awgood.

Sixitaan 20.3.2025: Waxaa la hagaajiyay oo sixitaan lagu sameeyay cinwaanka ogaysiiska, waxaana la faahfaahiyay arrinka ku saabsan, in baaritaanka otomaatigga ah uusan sida badan wax saamayn ah ku lahayn shaqada kaarka.